



Waddo looga baxo cunfiga

Utväg waxay caawisaa dadka xiriir dhow ku dhex maray cunfi, carruur iyo dhallinyaro la noolaa cunfi qoyska dhexdiisa.

Waa maxay cunfiga ka dhaca xiriirrada dhow?

Sanad walba, kumannaan qof ayaa la kulma cunfi uga yimaada qof ay xiriir dhow la leeyihiin ama horay ula soo xiriireen. Cunfiga noocan ah wuxuu ku dhici karaa qof kasta, iyadoon loo eegin jinsi, da', qowmiyad ama caafimaad.

Cunfigu wuxuu noqon karaa mid jireed, maskaxeed, galmo, dhaqaale, digital ah ama qarsoon. Mararka qaar wuu sii socdaa xitaa marka uu xiriirka dhammaado.

Cunfigu waa dhibaato weyn waana dembi. Wuxuu dhaawici karaa caafimaadka jirka iyo maskaxda, wuxuuna sababi karaa walwal, xanuun, niyad-jab iyo fikrado is-dilid ah. Wuxuu sidoo kale saameyn ku yeeshaa nolol maalmeedka iyo xiriirka dadka kale.

Marka lagu xadgudbo – dareenka iyo cawaaqibta

In lagu xadgudbo waxay keentaa dhaawac gudaha ah.

Ma lagugu sameeyay cunfi? Ama ma horay ayaad u la kulantay? Dad badan waxay dareemaan awood-darro, ceeb iyo go'doon. Waxay ka baqaan in cunfigu sii socdo.

Cunfiga maskaxeed wuxuu inta badan la socdaa cunfi jireed iyo galmo. Wuxuu mararka qaar soconayaa xitaa ka dib marka xiriirka dhammaado.

Utväg waxay siisaa dadka fursad ay uga hadlaan wixii ay la kulmeen. Waxaad fahmi kartaa saameynta uu cunfigu kugu yeeshay, waxaana lagaaga caawin karaa inaad rajeyso isbeddel.

Carruurta la nool cunfi guriga

Carruurta inta badan way arkaan cunfiga waxayna fahmaan waxa dhacaya, in kasta oo waalidiinta ay u maleynayaan inaysan arag.

Carruurta ku kora guri ay ka jiraan cunfi iyo hanjabaad waxay dareemaan cabsi iyo kalsooni darro. Waxaa ku adkaan karta inay fahmaan dareenkooda, taasoo dhibaato u keeni karta xiriirkooda dadka kale.

Utväg waxay carruurta siisaa taageero iyo fursad ay uga hadlaan wixii ay la kulmeen. Wadahadallada waxaa loo waafajiyaa da'da iyo heerka

bislaanshahooda. Carruurta waxay sidoo kale ka qeyb qaadan karaan kooxo ay la wadaagaan carruur kale oo waaya-aragnimo la mid ah leh.

Waalidka aan cunfiga sameynin wuxuu ka qeyb geli karaa koox waalidiin ah si uu u helo taageero iyo faham dheeraad ah oo ku saabsan waalidnimada.



Adigu ma isticmaashay cunfi?

Ma ku dhacdaa inaad xanaaqdo ama xakameyso lamaanahaaga? Caradaada iyo dhaqankaaga ma dhaawacaa adiga iyo qoyskaaga? Ma tahay qof maseyr badan ama xukuma lamaanihiisa? Ma ka cabsadaan carruurtaada ama lamaanahaaga?

Haddii aad isticmaashay cunfi, waxaad heli kartaa caawimaad. Qof kasta oo sameeya cunfi waa mas'uul falalkaas.

Utväg waxay kaa caawin kartaa inaad fahanto sababta aad sidaas u dhaqantay, mas'uuliyad u qaadato falalkaaga, ka shaqeyso isbeddel, oo aad barato siyaabo kale oo aan ahayn cunfi.

Utväg – Caawimaad iyo taageero ka dhan ah cunfiga

Utväg waxay siisaa taageero dadka cunfiga la kulmay ama sameeyay. Waxay caawisaa dadka lagu xadgudbay ama cunfi sameeyay, iyo sidoo kale carruur ku noolaa guryo ay ka dhacday cunfi. Taageeradu waa bilaash waxayna ku saleysan tahay rabitaankaaga.

Marka hore waxaad la kulmaysaa la-taliye si gaar ah, kadibna waxaa jiri kara fursad aad uga qeyb gasho koox.

Utväg waxay hoos timaadaa sharciga daryeelka caafimaadka. Taas micnaheedu waa in aan xogtaada qarino, haddii ay lagama maarmaan noqoto aan wargelinno hay'adaha, iyo in dhammaan xogaha lagu kaydiyo si qarsoodi ah.

La xiriir Utvåg

Ma isu dareemeysaa sidan oo ma rabtaa isbeddel? Waxaa jirta caawimaad la heli karo.


Adiga deggan Södra Älvsborg ama Skaraborg, waxaad taageero ka raadsan kartaa Utvåg, oo xarumo ku leh Borås, Skövde iyo Alingsås.

Lambarka taleefanka ee Skaraborg:

070 - 085 25 06

Lambarka taleefanka ee Södra Älvsborg:

070 - 716 09 29



Si aad u hesho macluumaad ku saabsan waqtiga taleefanka la wici karo, iskaangarey QR-koodka.

Waxa kale oo aad nala soo xiriiri kartaa adigoo maraya 1177.se

